IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

5aad Muqdisho 14 Luulyo 1977 1R7/B

Laanta Faafin Rasmiga ah ee ka tirsan Madaxtooyada J.D.S.

**BIL SOO BAX** ريدة شهرية

· waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadiī Sh. 100 Somali

— dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wux
I Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 la
. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga
— Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## K O O B N I I N

BOGGA KOOWAAD

**S H A R C I**

**W. M.**

BOGGA LABAAD

X E E R

XEE MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 6 Juunyo 77, Magacaabidda Guddoomiyaha Guddiga Joogtaynta Ololaha Horumarinta Reer Miyiga L. 58 — Bogga 680

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 9. Maarso 77, *Dhul Dawladeed la siiyay, gacantana loo geliyay Faarax Weheliye Cadow ku yaal Muqdisho — Xaafadda Hawl-Wadaag kuna fadhiya mq. 324 L. 59* — 681

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 9. Maarso 77, Cad dhul Dawladeed, gatay Jaalle Axmed Naa*ji Axmed ku yaal Muqdisho — Xamar Jajab (Ex Via 2 Dicembre) kuna fadhiya mq. 360 L. 60* — 683

**WAKAALADDA MADBACADDA QARANKA — MUQDISHO**

*BOGGA SADDEXAAD*

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 19.5.1977, *Naado Dhul Jaalle Cadar Cabdi Jaamac L. 296* 685

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 19.5.1977, *Naado Dhul Jaalle Cabdullaahi Nuur Xasan L. 297* 686

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 19.5.1977, *Naado Dhul Jaalle Maryan Maxamed Warsame iyo Ismaaciil Maxamed L. 298* 687

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 19.5.1977, *Naado Dhul Jaalle Culuma Cali Colow L. 299* 688

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 19.5.1977, *Naado Dhul Jaalle Jaamac Cilmi Cabdulle L. 300* 689

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 19.5.1977, *Naado Dhul Jaalle Sahra Khaliif Cabdi L. 301* 690

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 19.5.1977, *Naado Dhul Jaalle Cusmaan Axmed Cumar L. 302* 691

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 19.5.1977, *Naado Dhul Jaalle Axmed Xaaji Cali L. 303* 692

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 19.5.1977, *Naado Dhul Jaalle Maxamed Dable Ismaaciil L. 304* 693

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 19.5.1977, *Naado Dhul Jaalle Maxemd Cabdulaahi Guuleed L. 305* 694

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 19.5.1977, *Naado Dhul Jaalle Cabdi Axmed Looyaan L. 306* 695

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 19.5.1977, *Naado Dhul Jaalle Cusmaan Caydaruus Muuse* 696

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 19.5.1977, *Naado Dhul Jaalle Ibraahim Shire Maxamed* 697

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 19.5.1977, *Naado Dhul Jaalle Axmed Xaaji Aadan L. 309* 698

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 19.5.1977, *Naado Dhul Jaalle Cabdi Badhasaab Guuleed L. 310* 699

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 19.5.1977, *Naado Dhul Jaalle Cali Xaaji Ciise L. 311* 700

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 19.5.1977, *Naado Dhul Jaalle Cabduraxmaan Maxamed Warsame L.312* 701



WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 19.5.1977, *Naado Dhul Jaalle Maxamed Cabdullaahi Yaasiin L. 313* 702

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 19.5.1977, *Naado Dhul Jaalle Cabdulaahi Ducaale Cabdi L. 314* 703

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 26.5.1977, *Naado Dhul Jaalle Xasan Cabdullaahi Mahad. L. 315* 704

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 19.5.1977, *Naado* Naada Dhul Jaalle Muuse Cabdullaahi Mahad L. 31 705

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 26.5.1977, *Naado Dhul Jaalle Yarye Xaaji Ibrahim L. 317* 706

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 26.5.77, **Beddelaad** *Dhul Jaalle Cusmaan Cali Jaamac L. 318* 707

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 26.5.77, Beddelaad Naada Dhul Jaalle Xasan Faarax Cilmi L. 319 708

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 24.5.77, Beddelaad Naada Dhul Jaalle Cabdulle Shariif - Axmed Muxsin L. 320 709

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 26.5.1977, *Naado* Beddelaad Naada Dhul J/le Xasan Xaaji Cumar Yare L. 321 710

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 19.5.1977, *Naado* Beddelaad Naada Dhul J/le Xasan Jibriil Maxamed L. 322 711

Maxkamadda Gobolka Togdheer Burco 10.1.77 lumid buuga Kaydka L. 2288/7 u leeyaha Yuusuf Geedi Muuse L. 322/Bis 711/Bis

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 2.6.77, *Lumid Buuga L. 10.881 ku qoran Sh.s 2.150/= uu leeyahay Nuur Faarax Geedi L. 323* 712

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 26.5.77, *Lumid Buuga L.41 ku qoran Shs. 500/= uu leeyahay Cabdi Xasan L. 324* 713

Maxkamadda Gobolka Nuqul 4.4.77 lumid Buug L. 28 u leeyahay Yuusuf Xasan Xuseen L. 325 714

SOCIETA' ICREMENTO PRODUZIONI AGRICOLI S.I.P.A. Saldhigga Shalaambood-Ra'sumaal Shs. So. 8.112.000, oo L. 325/Bis 715

Maxkamadda Gobolka Banaadir, lumid Buug L. 6064 u leeyahay Ibraahim Maxamed Cusmaan L. 325/Bis L. 716

BOGGA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. 6.6.77, Magacaabid Guddoomiyaha guddiga joogteynta Ololaha Horumarinta Reer Miyiga L. 58

*MADAXWEYNAHA*

*J. D. S.*

ISAGOO ARKAY: Xaashiyaha 1aad, 2aad iyo 3aad ee Kacaanka 1ka Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 53 ee 20kii Oktoobar 1974, kuna saabsan daryeelidda Hurumarinta Reer Miyiga OHRM;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 10 ee 3dii Febraayo 1977, kuna saabsan baabi'inta Wasaaraddii hore ee Arrimaha Gudaha;

ISAGOO ARKAY: Xeerka Madaxweynaha JDS ee 5 Febraayo 1977, kuna saabsan magacaabidda Wasiirka Dawladda ee Madaxtooyada JDS;

ISAGOO AQOONSADAY: inay tahay lagama maarmaan in la magacaabo Guddoomiyaha Guddiga Joogteynta Ololaha Horumarinta Reer Miyiga si uu u buuxiyo halkii Xoghayihii Wasaaraddi Arrimaha Gudaha ee la baabbi'yey;

WUXUU XEERIYEY

**Qodobka 1aad**

Marka laga bilaabo 3dii Febraayo 1977,Wasiirka Dawladda ee Madaxtooyada, Jaalle Gaashaanle Sare Cabdi Warsame Isaaq, ayaa loo magacaabay Guddoomiyaha Guddiga Joogteynta Ololaha Horumarinta Reer Miyiga.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa 3 Febraayo 1977, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 6 GIU 1977

*Jaalle Maxamed Siyaad Barre*
*MADAXWEYNAHA*
*JAMHUURIYADDA DIMUQRAADIGA SOOMAALIYA*



Xeer Wasaaradda Hawlaha Guud 9.3.77: Dhul Dawladeed la siiyay gacantana loo geliyay Faarax Weheliye Cadow —ku yaal Muqdisho— Xaafadda Hawlwadaag—kuna fadhiya mq. 324. L. 59

*W A S I I R K A*

ISAGOO ARKAY: Warqaddii Koowaad, labaaad iyo tan seddexaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lamb yihiin 17, 18, 19 soo baxday 1dii Luuliyo 1976 oo ku saabsan Xukunka Dalka oo la wareegtay Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY: Xeerka Sharciga dhulka lamb 41 soona baxay 13kii Setembere 1973;

ISAGOO ARKAY: Xeer lamb 6 soona baxday 9 Jennaayo 1967;

ISAGOO ARKAY: Arjigii uu keensaday Nuur Jumcaale Daauud taariikhdu markay aheyd 5.7.1972 kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho — Xaafadda Hal-Wadaag kuna dhacaaya qaybta VII.

ISAGOO AQOONSAN: Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, Lamb. 3/9 soona baxday 26 Setember 1972, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGOO ARKAY: Naqshadda lamb. 11198, kuna saabsan dhismo dhe-

ISAGOO ARKAY: Naqshadda lamb. 11198, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga Dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho, fadhigoodi 1aad taariikhdeeduna ahayd

9 **Maarso**

ISAGOO ARKAY: Bolleetada lamb. 299631 ee 11.4.1976 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban taas oo caddeyneysa in Nuur Jumcaale Daauud uu bixiyay lacag dhan Sh. So. 324 kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGOO AQOONSAN: Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 324 loona tiriyay Nuur Jumcaale Daa'uud sida ku cad xaashiday qortay waaxda Farsamad dhulka (Verbale di consegna) taariikhduna ahayd 12.4.1976;

ISAGOO ARKAY: Warqadda ku qoran qaynuunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tilmaameyso dhulka isaga ah;

ISAGOO ARKAY: Xaqiijintii Farsamada ka tirsan waaxda Dhismaha iyo dhulka; taariikhdeeduna ahayd 25.1.1977 taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen Guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar lamb. 11198 ee 9.3.1976 laguna xaqiijiyay sida ay naqshaddu guriga waafaqsan tahay;

ISAGOO ARKAY: Oggolaanta (Nulla Osta) dagganaashada guriga ku dhisan Xamar Degmada Hawl-Wadaag laguna siiyay xaashida lam. 1890 ee 27 Mag. 1976 ee Dowladda Hoose ee Xamar;

ISAGOO ARKAY: Qoraalka rayadka ah (Scrittura privata) laguna bixiyay xeer iyo xisiba, taariikhdeeduna ahayd 24.12.1975 laguna diiwaan geliyay Xamar 10.7.1976 lamb. 210 Qoraal rayad, buuga 21 loogana qaatay Sh. So. 3.446 taas oo Nuur Jumcaale Daa'uud wuxuu ka kaday kuna wareejiyay Faarax Weheliye Cadow, wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 324 kuna yaal Muqdisho — Degmada Hawl-Wadaag;

ISAGOO AQOONSAN: In la tixgeliyay wax allaale wixii waajib ahaa kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u gelinta dhulka Dowladda Concessione e conseguente libera disponibilita) oo ay ujeeddadiisu ahayd dhis, wuxuu soo saaraya.

**XEER**

Waxaa dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay, loona aqoonsaday Faarax Weheliye Cadow, dhul ku fadhiya mq. 324 kuna yaalMuqdisho — Degmada Hawl-Wadaag.

Muqdisho, 9.3.77

*Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud*

*INJ. MAXAMED XAWAADLE MADAR*

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 6

Muqdisho, 20 Mar. 1977.

Ku xigeenka Hantidhawraha Guud

*Yuusuf Cali Nuur*



Xeer Wasaaradda Hawlaha Guud 9.3.77, Cad dhul Dawladeed, gatay Jaalle Axmed Naaji—ku yaal Muqdisho Xamar Jab-jab (ex Via 2 Dicembre) kuna fadhiya mq. 360. L. 60

WASIIRKA

ISAGOO ARKAY: Warqaddii Koowaad, labaad, iyo tan seddexaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lamb. yihiin 17,18,19 soo baxday 1 Luulyo 1976 oo ku saabsan Xukunka Dalka oo la wareegtay Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY: Xeerka Sharciyada dhulka lamb. 41 soona baxday 13kii Seteember 1973;

ISAGOO ARKAY: Xeer lamb. 6 soonna baxday 9 Jennaayo 1967;

ISAGOO ARKAY: Arjigii uu keensaday Cabdulqaadir Cilmi taariikhdeeduna markay ahayd 19 Dicember 1961, kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho — Degmada Xamar Jab-Jab — kuna dhacaaya qaybta V;

ISAGOO AQOONSAN: Naadada dhulka; kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, lamb. 1/4 ee 10 Apr. 1966, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGOO ARKAY: Naqshadda lamb. 135, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho, fadhigoodii 20 aad taariikhdeeduna ahayd 16.1.1968, kuna saabsaneed dhismo Guri;

ISAGOO ARKAY: Bolleetada lamb.100743 ee 27.1.1968 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Cabdulqaadir Cilmi uu bixiyay lacag dhan Shs. So. 724 kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGOO AQOONSAN: Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 360 loona tiriyay Cabdulqaadir Cilmi sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Farsamada Dhulka (Verbale di consegna) taariikhdeeduna ahayd 29.1.1968;

ISAGOO ARKAY: Warqadda ku qoran qaynuunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tilmaameyso dhulka isaga ah;

ISAGOO ARKAY: Qoraal (Atto) lamb. 11899 Reb. taariikh. 12.7.70 lagu diiwaan geliyay Xamar 18.7.1970 al n. 578 Atti Pubblici Vol. 19 oo ah caddeynta Notaayada Dr. Cumar Xaaji Bod taas oo Cabdulqaadir cilmi Axmed ka gaday kuna wareejiyay Xaaji Moxamed Callaso Barre wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 360/= kuna yaal Muqdisho — Degmada Xamar Jab-jab;

ISAGOO ARKAY: Qoraal (Atto) lamb. 21695 Reb. taariikh 1.2.1977 lagu diiwaan geliyay Xamar 1.2.1977 al n. 33 Atti Pubblici Vol. 22.oo ah caddeynta Notaayada Dr. Muumin Axmed Abuukar taas oo Xaaji Maxamed Calasow Barre ka gaday kuna wareejiyay Axmed Naaji Axmed wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq.360 kuna yaal Muqdisho — Degmada Xamar Jab-jab;

## X E E R

Waxaa cad dhul Dowladeed la siiyay, Jaalle Axmed Naaji Axmed, kana dhisan Guri iyo derbi wareegsan (Dekereeto di concessione) dhul ku fadhiya mq. 360/= kuna yaal Muqdisho — Degmada Xamar Jab — Jab.

Muqdisho, 9. MAR 1977.

*Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud*

*INJ. MAXAMED XAWAADLE MADAR*

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 8.

Muqdisho, 20 MAR. 1977.

Ku Xigeenka Hantidhowraha Guud.

*Yuusuf Cali Nuur*



BOGGA SADDEXAAD

## MASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAH IYO DHULKA

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cadar Cabdi Jaamac u soo qortay arji waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 20.4.77 uu ku weydiisanaaayey Gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Maagaladatan Xamar Degmada Hodon qaabkiisuna yahay Ritaangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/= Mdh; soohdimihiisuna yihiin

Waqooyi waxaa ka xiga: JID

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 419

Galbeed waxaa ka xiga: JID

Bari waxaa ka xiga Dhul lam. 420

Qofkii doonayaa Dhulkaa wuxuu si Fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho:- 19.5.1977

AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

*INJ. Caydaruus C. Keeynadiid*

L. 296

## MASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAH IYO DHULKA

### *NAADA DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdulaahi Nuur Xasan u soo qortay arji waaxdatan dhismaha dhulka maalintii taariikhdu ahayd 17.3.1977 uu ku weydiisanaayey gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Yaaq-Shiid qaabkiisuna yahay Regtaangol Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600/=Mdh; soohdimisuna yihiin sida tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Maxamed Jimcaale

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Dowladeed

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Dowladeed

Bari waxaa ka xiga: Wadada Balcad

Qofkii Danaynaaya Dhulkaas wuxuu si Fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buuga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho:- 19.5.1977

AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

*INJ. Caydaruus C. Keenadiid*

L. 297



## MASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAH IYO DHULKA

### *NAADA DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maryan Maxamed Warsame iyo Ismaaciil Maxamed Cabdi u soo qortey arji waaxdatan Dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 26.4.77 uu ku weeydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaiadatan Xamar Degmada Wadajir qaabkiisuna yahay Regtaangol Addimihiisuna yihiin 27X27/= kuna fadhiya 729/=noolh. soohdimihiisuna yihiin siaa ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 119 & 120

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 285 & 206

Galbeed waxaa ka xiga: W A D D O

B a r i waxaa ka xiga: W A D D O

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si Fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doooi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo la-

Muqdisho:- 19.5.1977
ga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

*INJ. Caydaruus C. Keenadiid*

L. 298

MASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAH IYO DHULKA

*NAADA DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Culuma Cali Calow u soo qortay arji waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 12.3.77 uu ku weeydiisanaayey gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Yaaq-Shiid qaabkiisuna yahay Regtaangol Addimihiisuna yihiin 20X23 kuna fadhiya 460/=Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:-

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 12

Koonfur waxaa ka xigag: Dhul lam. 14

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 18

B a r i waxaa ka xiga: W A D DO

Qofkii Danaynaaya Dhulkaas wuxuu si Fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho:- 19.5.1977

AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

*INJ. Cadaruu C. Keenadiid*

L. 299



MASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAH IYO DHULKA

*NAADA DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Jaamac Cilmi Cabdulle u soo qortay arji waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 7.3.1977 uu ku weeydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodon qaabkiisuna yahay Regtaangolaar Addimihiisuna yihiin 150X30 kuna fadhiya 450=Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Cabdullaahi Saciid Caraale

Koonfur waxaa ka xiga: WODDO

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay

Bari waxaa ka xiga: Dhul Dowladeed

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si Fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha yio Dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaab o Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho:- 19.5.1977

AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

*INJ. Caydaruus C. Keenadiid*

L. 300

MASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAH IYO DHULKA

*NAADA DHUL*

Waxaa la caddeeynayaa in Jaalle Sahra Khaliif Cabdi u soo qortay arji waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 12.4.77 uu ku weeydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodon qaabkiisuna yahay Regtaangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/=Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 430

Koonfur waxaa ka xiga: W A D D O

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 429

B a r i waxaa ka xiga: Dhul lamb. 433

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si Fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho:- 19.5.1977

AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

*INJ. Caydaruus C. Keenadiid*

L. 301



MASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAH IYO DHULKA

*NAADA DHUL*

Waxaa la caddeeynayaa in Jaalle Cusmaan Axmed Cumar u soo qortay arji waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 23.11.76 uuku weeydiisanayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodon qaabkiisuna yahay Regtaangol Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600/=Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: WADDO

Koonfur waxaa ka xiga: WADDO

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 294

B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 296

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si Fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxdatan dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho:- 19.5.1977

AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

*INJ. Cadaruus C. Keenadiid*

L. 392

WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Axmed Xaaji Cali u soo qortay arji waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 17.4.1977 uu ku weeydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodan qaabkiisuna yahay Regtaangol Addimihiisunayihiin 20×30 kuna fadhiya 600/=Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:h

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 425

Koonfur waxaa ka xiga: WADDO

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 423

Bari waxaa ka xiga WADDO

qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si Fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho:- 19.5.1975

**AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA**

**INJ. *Caydaruus C. Keeynadiid***

L. 803



WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Maxamed Dable Ismaaciil u soo qortey arji waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 7.4.1977 uu ku weeydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodon qaabkiisuna yahay Regtangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/=; Soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: JID

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 375

Galbeed waxaa ka xiga Dhul lamb. 370

Bari waxaa ka xiga: Dhul Lam 372

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si Fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho:- 19.5.1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. Caydaruus C. Keeynadiid*

L. 304

WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O  D H U L

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Maxamed Cabdullaahi Guuleed u soo qortey arji waaxdatan Dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 26.2.77 uu ku weeydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodon qaabkiisuna yahay Retaangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/= Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: JID

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul L. 326

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul L. 331

Bari waxaa ka xiga: JID

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si Fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho:- 19.5.1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. Caydaruus C. Keeynadiid*

L. 305



WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O  D H U L

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Cabdi Axmed Looyaan u soo qortey arji waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 17.4.1977 uu ku weeydiisanaayey gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodon qaabkiisuna yahay Regtangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/=Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: WADDO

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 423

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 420

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 424

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si Fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho:- 19.5.1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. Caydaruus C. Keeynadiid*

L. 306

## WASAARADDA HOWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O D H U L

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Cusmaan Caydaruus Muuse u soo qortey arji waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 10.6.1976 uu ku weeydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo kuyaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodon qaabkiisuna yahay Regtangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/=Mdh; Soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: WADDO

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 2 K

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 13 K

B a r i waxaa ka xiga: Dhul lamb. 15 K

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si Fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho:- 19.5.1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. Caydaruus C. Keeynadiid*

L. 307



## WASAARADDA HOWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O D H U L

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Ibraahim Shire Maxamed u soo qortey arji waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 17.3.1977 uu ku weeydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo kuyaal MagaalaOdatan Xamar Degmada Hodon qaabkiisuna yahay Regtaangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600=/Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: WADDO

Koonfur waxaa ka xiga: WADDO

Galbeed waxaa ka xiga: WADDO

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul lamb. 401

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si Fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho:- 19.5.1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. Caydaruus C. Keeynadiid*

L. 308

## WASAARADDA HOWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O  D H U L

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Axmed Xaaji Aadan u soo qortey arji waaxdatan Dhismaha iyo eDhulka maalintii taariikhdu ahayd 20.3.77 uu ku weeydiisanaayey gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodon qaabkiisuna yahay Regtangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/=Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 376

Koonfur waxaa ka xiga: JID

Galbeed waxaa ka xiga: JID

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 381

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si Fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho:- 19.5.1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. Caydaruus C. Keeynadiid*

L. 309



## WASAARADDA HOWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O  D H U L

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Cabdi Badhasaab Guuleed u soo qortey arji waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 27.4.1977 uu ku weeydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo kuyaal Magaaladatan Xamar Degmada Hawl Wadaag qaabkiisuna yahay Regtaangol Addimihiisuna yihiin 17, 50X13, 50 kuna fadhiya 836.25=/ Mdh; Soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: WADDO

Koonfur waxaa ka xiga: WADDO

Galbeed waxaa ka xiga: WADDO

B a r i waxaa ka xiga: Axmed Maxamed

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si Fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho:- 19.5.1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. Caydaruus C. Keeynadiid*

L. 310

## WASAARADDA HOWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O  D H U L

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Cali Xaaji Ciise u soo qortey arji waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 23.3.1977 uu ku weeydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodon qaabkiisuna yahay Regtangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/=Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: WADDO

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lamb. 380

Galbeed waxaa ka xiga: WADDO

B a r i waxaa ka xiga: Dhul lamb. 377

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si Fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho:- 19.5.1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. Caydaruus C. Keeynadiid*

L. 311



## WASAARADDA HOWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O  D H U L

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Cabduraxmaan Maxamed Warsame waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 17.11.76 uu ku weeydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodon qaabkiisuna yahay Regtangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/=Mdh; soohdimiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 406

Koonfur waxaa ka xiga: JID

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 405

B a r i waxaa ka xiga: Dhul lamb. 409

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si Fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho:- 19.5.1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. Caydaruus C. Keeynadiid*

L. 312

WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O D H U L

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Maxamed Cabdullaahi Yaasiin u soo qortey qortey arji waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 3.7.1976 uu ku weeydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal magaaladatan Xamar Degmada Hodon qaabkiisuna yahay Regtaangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600/=Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: WADDO

Koonfur waxaa ka xiga: WADDO

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 113K

B a r i waxaa ka xiga: Dhul lamb. 115K

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si Fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho:- 19.5.1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. Caydaruus C. Keeynadiid*

L. 313



WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O D H U L

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Cabdulaahi Ducaale Cabdi u soo qortey arji waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 18.4.1977 uu ku weeydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodon qaabkiisuna yahay Regtangol Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600=/Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lamb. 400

Koonfur waxaa ka xiga: JID

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 399

B a r i waxaa ka xiga: Dhul lamb. 405

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si Fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laa bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho:- 19.5.1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. Caydaruus C. Keeynadiid*

L. 314

WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Xasan Cabdullaahi Mahad u soo qortey arji waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 2.2.77 uu ku weeydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodon qaabkiisuna yahay Regtangol Addimihiisuna yihiin 20X40 kuna fadhiya 800/=Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: WADDO

Koonfur waxaa ka xiga: WADDO

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 364

B a r i waxaa ka xiga: Dhul lamb. 366

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si Fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho: 26.5.1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. Caydaruus C. Keeynadiid*

L. 315



WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Muuse Cabdullaahi Mahad u soo qortey arji waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 5.2.1977 uu ku weeydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodon qaabkiisuna yahay Regtaangol Addimihiisuna yihiin 30X40 kuna fadhiya 1200/=Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: WADDO

Koonfur waxaa ka xiga: WADDO

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 363

B a r i waxaa ka xiga: Dhul lamb. 365

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si Fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho: 26.5.1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. Caydaruus C. Keeynadiid*

L. 316

WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O  D H U L

Waxaa la cadeeynayaa in Jaalle Yaxye Xaaji Ibraahim u soo qortey arji waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 1.2.1977 uu ku weeydiisanaayey gabal dhul Dowladeed ah oo ku yaal magaaladatan Xamar Degmada Hodon qaabkiisunaa yahay Regtangol Addimihiisuna yihiin 30X40 kuna fadhiya 1200/=Mdh; soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman;

Waqooyi waxaa ka xiga: WADDO

Koonfur waxaa ka xiga: WADDO

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 358

Bari waxaa ka xiga: Dhul lamb. 360.

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si Fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho: 26.5.1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. Caydaruus C. Keeynadiid*

L. 317



WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O  D H U L

Waxaa la cadeynayaa in Jaalle Cusmaan Cali Jaamac u soo qortey arji waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 11.5.77 uu ku weeydiisanaayey gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal magaaladatan Xamar Degmada Hodon qaabkiisuna yahay Regtangol Addimihiisuna yihiin 30X40/= kuna fadhiya 1200 Mdh. soohdimihiisuna yihiin sida ku tilmaaman;

Waqooyi waxaa ka xiga: JID

Koonfur waxaa ka xiga: JID

Galbeed waxaa ka xiga: JID

B a r i waxaa ka xiga: Dhul lamb. 363

Qofkii Danaynayaa Dhulkaas wuxuu si Fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee wasaaradda H. G. waxaana laga doodi karaa muddo (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo Maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah:-

Muqdisho: 26.5.1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. Caydaruus C. Keeynadiid*

L. 318

## WASAARADDA HOWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### B E D D E L A A D N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay jaalle Xasan Faarax Cilmi maalintii 23.11.1966 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Afgooyo 70Km. jidka Afgooyo uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa Regtaangol addimihiisuna ahaayeen 60X50 = kuna fadhiye 3000/=mdh, sababtoo ah

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa 1646/996/63.23/6/ 1968 kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa Regtaangol addimihiisu yihiin 30X40 kuna fadhiya 1200/mdh. soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:-

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | WADDO |
| Koonfur waxaa ka xiga: | WADDO |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Dhul lamb. 418 419 |
| B a r i waxaa ka xiga: | Dhul lamb. 422 423 |

Muqdisho, 26.5.1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. Caydaruus C. Keeynadiid*

L. 319



## WASAARADDA HOWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### B E D D E L A A D N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Cabdalla Shariif Axmed Muxsin maalintii 15.7.1968 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada C/Laate jidka uu isku beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa Regtaagolo addimihiisuna ahaayeen 60X50 kuna fadhiye 3000/Mdh, sababtoo ah

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa 1302/1918/3/9/68 kana baxday xaiifksaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin karo jaallahaas qaabkiisu waa Regtaangol addimihiisu yihiin 40X30 kuna fadhiya 1200 Mdh soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:-

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | WADDO |
| Koonfur waxaa ka xiga: | WADDO |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Dhul lamb 453 iyo 459K |
| B a r i waxaa ka xiga: | Dhul lamb 462 iyo 463K |

Muqdisho, 24.5.77

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. Caydaruus C. Keeynadiid*

L. 320

WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

B E D D E L A A D N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Xasan Xaaji Cumar Yare maalintii 3.7.68 loona ogalaaday oo ku yiil Muqdisho Degmada G/Laate Jidka uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa Retangol addimihiisuna ahaayeen 65X35 kuna fadhiya 2275/mdh, sababtoo ah.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa 1190/1904/3/9|68 kana baxday Xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo Jaallayaasha qaabkiisu waa IRREGOLAARE addimihiisu yihiin 28+26): 2+2(49+39): 2X20= kuna fadhiya 1420/Mdh. soohdimisuna yihiin sida soo socota:-

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul dad Leeyahay

Koonfur waxaa ka xiga W a d d o

Galbeed waxaa ka xiga D ad d o

Bari waxaa ka xiga Dhul dad Leeyahay

Muqdisho 24 Magi 1977

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. Caydaruus C. Keeynadiid*

L. 321



WASAARADDA HOWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

B E D D E L A A D N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiista Jaalle Xasan Jibriil Maxamed maalintii 9/6/68 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodon Jidka uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa Retangol addimihiisuna ahaayeen 44X60 kuna fadhiye 2640|mdh, sababtoo ah Qorshaha Dhulka oo is Baddelay.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa 871/1160/68/6|7/68 kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:-

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo Jaallayaashaas qaabkiisu waa TRAPEZIO addimihiisuna yihiin 47+57X37 kuna fadhiya rapezzio qoran.ojwo a3iisn yqQio5

1924/= soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:-

Waqooyi waxaa ka xiga GAL. Lambar 394/61

Koonfur waxaa ka xiga: Gal Lambar 889/68

Galbeed waxaa ka xiga: Gal 2/61

B a r i waxaa ka xiga: D a d d o

*AGAASIMAHA WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA*

*INJ. Caydaruus C. Keeynadiid*

L. 322

*MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER EE BURCO*

MARKII AAN ARKAY; Arjiga dacwoodaha Yuusuf Geedi Muuse sheegtay inuu ka lumay Buuga Keydsiga ee sumaddiisu tahay X/S Lr. 2288/7 kuna tiil lacag dhan Shs. 3.000/= (saddex kun) shs; ee ka soo baxay Bankiga Gancsiga Ummadda (Laanta Burco).-

MARKII AAN ARKAY; Warqadda sumad. tahay 0039 ee Taar. 9.1.77 oo ka timid Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta Burco oo ay hubiyeen in Buugaasu jiro.

MARKII AAN ARKAY; hubiyay in dacwoodaha doodiisu run tahay, isla markaasna aan arkay qod. 27 ee Xeerka sumadiisu tahay 2 sano na baxay 9.965. Ayaan guddoonshay in Buuga sumadiisu tahay X.S. Lr. 2288/7 la baabi'iyo, Bankiga Ganacsiguna u celiyo Jaalle Yuusuf Geedi Muuse lacagta ku qornayd buugaas Kaydsiga sum. tahay 2288/7, 30 casho ka dib marka lagu qoro Faafinta rasmiga ah.

Burco, 10.1.77

(Sh. Cusmaan Sh. Cali)
K/S Guddoomiyaha Maxkamadda G. Togdheer

L. 322/Bis



MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

HADDUU ARKAY: dacwaadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska bangiga;

HADDUU ARKAY: qod. 69 D.L. 9/9/65 N. 2; lumidda kaydka Lam. 10.881, oy ku qoran tahay lacag dhan di Ch. So. 2.150,00

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo ka dib markii ay ka soo wareegto 30 Buuga Kaydka 1 okl maalmood maalinta dekeretada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buuga cusub ee la sameeyn doono gacanta la saaro Nuur Afrax Geedi ama qof isla asaga ka sita Wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada [illegible] 30/= maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay

Muqdisho, 2/6/77

GUDDOOM. MAXKAMADDA GOBOL. BENAADIR
(CABDULLAHI DAAHIR BARRE)

L. 323

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

HADDUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska bangiga;

HADDUU ARKAY: qod. 69 D.L. 9/9/65 N. 2; lumidda Buuga Kaydka Lam. 41 oy qoran tahaybdi Sh. So. 500/=

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Buuga Kayda ka dib markii ay ka soo wareegto 1 okl 30/= maalmood maalinta dekeretada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

Ih Buuga cusub ee sameyn doono gacanta la saaro Cabdi Cali Xasan — ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada [illegible] 30/= maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay Muqdisho, 16/5/77

GUDDOOM. MAXKAMADDA GOBOL. BENAADIR.

(CABDULLAHI DAAHIR BARRE)

L. 324



*MAXKAMADDA GOBOLKA NUGAAL*

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Nugaal ee Garoowe,

MARKUU ARKAY:- Arjiga Jaalle Yuusuf Xasan Xuseen, degan Garoowe Tar. tahay 4.4.77 iyo Xaashida ogeysiiska Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta Garoowe L. yahay 00015 ee 7.2.77

*HADDU* ARKAY: Qod. 69 L. 9.9. 1965 N. 2

Waxaa u caddaatay in buugga Lambarkiisu yahay 28 Taar. tahay 14.2.1976, (Ammortamento Libereto Risparmio) uu dhumay, Buugaas oo ay ku qoran tahay lacag dhan Shs. 3022 (saddexkun laba iyo labaatan) ee Bangiga Ganacsiga Ummadda Laanta garoowe. wuxuuna amrayaa in loo cusboonaysiiyo mar kale Buugga kor ku xusan, Jaalle Yuusuf Xasan Xuseen muddo 30 beri ah oo ka bilaabata markii lagu faafiyo Faafinta rasmiga ah (Boollettiino Ufficiala) haddaan la helin qof sheegta waa in gacanta laga saaraa ninka ujeeddada ku qoran, ama qof ka wata wakaalad sharci ah 30 ka maalmood oo kor lagu sheegay waa in sugaa, isla markaasna waxaa lagu amrayaa Yuusuf Xasan Xuseen in uu geliyo Faafinta Rasmiga ah bixiyana kharajka lagu shaacinayo.-
Garoowe, 4.4.77

Kaaliyaha Maxkamadda Guud. Maxkamadda Gobolka Nuqul

MAXAMED XASAN LARANE Dr. BASHIIR CARTAN DIRIR

L. 325

*SOCIETA' INCREMENTO PRODUZIONI AGRICOLE -S.I.P.A.-*
*Saldhigga Shalaambood-Ra'sumaal Shs. So. 8.112.000,oo*

*OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AAN AHAYN.*

Sahmi qabayaasha Sharikadaha Societa' Incemento produzione Agrile - S.I.P.A. - S.P.A. - waxaa la isu yeeray shirka aan caadiga ahayn oo lagu qaban doono Xafiiska Rag. Artituro Salvi ee Muqdisho, maalinta 31ka Uuulyo 1977, saacaddu markay tahay 10ka subaxnimo fadhiga ugu horeeya, haddii taas suura geliwaayo, waxaa mar labaad la isu imaan doonaa 1 Agoosto 1977 isla saacadda kor ku xusan, sii go'aan looga gaaro arrimaha soo socda:-

MARNAAMIJKA SHIRKA

1) Beddelaat Shareiga Shirkadda iyo dhab ahaantiisa qodobka $3_0$ oo ah magaca saldhigga Shirkadda iyo qodobka 16 ee dhisidda lambarka Guddiga Maamulka.

Waxaa xaq u leh in ay shirka ka soo qayb galaan, sahmi qaybayaasha ku qoran buugga Shirkadda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhig la qaban doono.

*GUDDIGA MAAMULKA*

SOCIETA' INCREMENTO PRODUZIONI AGRICOLE -S.I.P.A.-
Societa' per Azioni — Sede Sociale in Scialambot

*Capitale Sociale versato Shs. So. 8.112.000,oo*

*AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA STRAORDINARIA*

I Signori Azionisti della Societa' Incremento Produzioni Agricole -S.I.P.A. - S.P.A. Sono convocati in Assemblea Straordinaria presso lo Studio Commerciale Rag. Arturo Salvi in Mogadiscio, per il giorno 31 Luglio 1977 alle ore 10 in prima convocazione ed, occorrendo, per il giorno 1 Agosto 1977 alla stessa ora e nello stesso luogo per discutere e deliberare sul seguente:-

*ORDINE DEL GIORNO*

1) Modifica Statuto Sociale e precisamente dell'articolo $3_0$ relativo al nome della sede sociale e dell'articolo 16 per il numero dei membri componenti in Consiglio di Amministrazioni.

Avranno diritto di intervenire all'Assemblea gli Azionisti prima inscritti nel Libro Soci almeno cinque giorni di quello fissato per l'Assemblea.

*IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE*

L. 325



MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

HADDUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska bangiga;

HADDUU ARKAY: qod. 69 D. L. 9/9/65 N. 2; lumidda Buuga Keyda Lam. 6664 di Sh. So. 450/=

WUXUU AMRAYAA

.. .. ay ka soo wa-
1 30/ shaaciyo faafin-

WAXAA LA CODSANAYAA

cusub doono gacanta lasaaro Ibraahim
ka sita wakaalad sharci ah aya-
ama = maalmood ah ee aan kor ku

Muqdisho, 15/4/77

GUDDOOM. MAXKAMADDA GOBOL. BENAADIR
(CABDULLAHI DAAHIR BARRE)

L. 325

L. 325/Bis